




# Marti-gelinta iyo Marti-soorka Soomaalida

Leveled



Af Somali



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



# Marti-gelinta iyo Marti-soorka Soomaalida

Fasalka 3

| Toddobaadka 25



## Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 3<sup>aad</sup>.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorarka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.

Sababtoo ah waxaa laga raba baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raaca talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudahiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin, waa in uu baruhu weydiiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqti fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeeyaan akhiska sheekada, baruhu waa in uu waydiiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

### Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. Waa maxay martigelinta?



## Marti-gelinta iyo Marti-soorka Soomaalida

Dhaqammada fiican ee ay Soomaalidu lahaan jirtay waxa ka mid ah marti-gelinta iyo marti-soorka. Dadku wuxu u badnaan jiray reer guuraa xoolo-dhaqato ah.

Tuulooyin iyo magaalooyin ma jirin, markii ay bilaabmeenna waa ay kala foogaayeen aadna waa ay u yaraayeen.

Dadku beryahaa socodka ayay wax ku qabsan jireen. Baabuur la raaca ma jirin. Dadku wuu lugeyn jiray. Sidaa darteed ayay dhaqanka uga mid noqotay in la isu dhaxo oo la is-marti-geliyo. Dadku dano iyo muraaddo badan ayay u socon jireen.

Qofku mar sahan ayuu ahaa. Marna safar xoolo iib-geynaya ayuu ahaa.

Mar ayuu booqasho ugu tegi jiray dad xigto ah oo ka durugsan. Mar kale ayuu guur doon ahaa, marna cilmi-daalib ayuu ahaa. Mar kale baadi doon ayuu ahaa. Siyaabahaa iyo siyaabo kale oo badan ayuu dadku u socon jiray. Dhaqanka fiican ee marti-gelinta ayay Soomaalidu kaga dabbaalan jirtay safarradaa iyo socdaalladaa ku lammaanaa noloshooda.

Qofku sahay ku filan ma qaadan jirin ama maba haysan. Mar haddii uu dadku isu roon yahay ma jirto sabab weyn oo uu qofku u qaato sahay.

Hor Ilaahay ayuu qofku u socon jiray. In kastoo magaalooyin wax laga iibsado iyo gaadiid la helay, haddana weli caadadii waa ay Ina la socotaa. Socdaalku wuxuu lahaa xeer. Ninka loo martida yahayna xeer waxa ugu mudnaa xeerka ruuxa socotada ah in naftiisa iyo maalkiisu badbaado iyo nabadgelyo in uu dhulka ku maro. Qofkaa socotada ah beesha uu martida u yahay iyo beesha uu ka dhashay haddii ay colaad xumi dhex taallo, qofkaa aad ayaa la iskaga ilaalin jiray.

Xil dheeraad ah ayaa la iska saari jiray ilaa uu beesha ka dhammaanayana rag ayaa la sii raacin jiray. Xeerkaa ayaa kuwa ugu waaweyn ka mid ahaa. Reerka loo soo hoyday ee loo martida yahay xeerka ugu weyn ee uu lahaa waxa ka mid ahaa in aan lagu raagin. Oo haddii habeen ama laba lagu dhaxo laga dul kaco Illeyn socotaa la ahaaye waa laga amba-baxaa halkii lagu socdayna waa loo jihatay. Waa kii la yidhi marti maalin iyo habeen bay muna leedahaye.





## Sheekooyinka martigalinta

Murtida socotada waxa ka mid ahaa nin reer u soo hoyday ee subag cod-cod ah la siiyay ee lagu yidhi: “Raalli ahaw oo wax kale ma haynee subaggaa cod-codka ah dibnaha marso oo dufan uga dhigo.”Habeen labaadkii reerkii uu u hoyday waxay siiyeen hilib saaf ah oo engegan. Waxa ay u raaciyeen: “Saafkaa iska burburso wax lagu daro ma hayno ee’. Ninkaasi wuxu reebay murtida caanka ahayd ee odhan jirtay: ”Wa

r illeyn wax aanad lahayn iskuma wada cuntid.”

Labadii shay ee isku-cunka isugu wanaagsanaa ayaa laba habeen oo is-xiga midba mid la siiyay. Wacnaan lahaydee iyada oo mar la isku wada siiyo, waa sida uu maah-maahda u dhigaye. Ka soo qaad laba habeen oo is-xiga oo laba reer oo aad kala martiday midna subag ku siiyay kii kalana roodhi. Waxa la yidhi nin baa reer u soo hoyday. Reerkii waxay siin lahaayeen waa ay ka biiyo diideen oo waxay ku yidhaahdeen reerkaa nagu xiga ayaa dhaankii iyo safarkiiba u yimaaddeen e’

Inta aan cadceeddu dhicin gaadh iyaga ayaa si wanaagsan kuu sooriye’. Markiiba wuxuu gartay in ay dirayaan oo aysan

waxba u hayn rabaana inay iska ga diraan. Wuxu reebay murtida caanka noqotay ee carrada Soomaaliyeed laga wada yaqaan ee ah: “Carraabe fadhi baa quusiyay”. Sidaas ayaa lagu sooryeeyay oo wax lagu siiyay. Waxaa halkan si cad uga muuqata in dhaqanka marti-gelinta Soomaalidu ka sinnayd waxa la isku ammaanana uu ahaan jiray ilaa maantana uu sidaas yahay.

Sheekooyinka marti-gelinta, deeqsiga iyo bakhaylka waa ay badan yihiin, waxa la yidhi nin baa marka ay martidu u soo hoyato, dermo inta uu soo qaato ardaaga la seexan jiray. Marka ay yidhaahdaan war waa sidee, maxaa ku seexinaya halkan wuxu odhan jiray: “Martidu wax ayay

ka tuhun badan tahay oo waxa ay la tahay in guryaha wax lagu cuno, markaa waxaan idin tusayaa in aan aniguba idin la qatanahay oo halkan ayaan idin la seexanayaa.”

Sheekooyinka kale ee martida ku saabsani waxa ka mid ah, nin baa laba geela soo kaxaystay oo wuxuu yidhi: “Bal waxa magaalo iyo il-baxnimo la yidhaahdo ayaan soo eegayaa.” Labadii awr ayuu iibiyay. Markii uu reerihii ku noqday ayaa lagu soo ururay oo la wareystay oo waxaa lagu yidhi: “Waar magaalo

iyo il-baxnimo ka warran?” Wuxuu yidhi: “Labadiiba waan soo arkay. Wixii la I noo sheegayay ee la inooga dhigayay wax weyn waxay noqotay wax fudud.



Il-baxnimo waxay noqotay nin walowba keligaa waxaaga cun.” Wuxu ku daray: “Ma waxaad aragteen nin weyn oo keligii wax cunaya oo ummad badani hereero tuban tahay oo aan qof qudh ah u yeedhayn oo aan odhanayn gacanta Ila geli cuntada oo sidaa maqsuud ku ah oo isla qumman oo in uu ceeb sameeyayba aanay u dhacsanayn.” Wuxu ku daray oo yidhi: “Il-baxnimoy ba’. Nin bakhayl ah oo kelidii wax cunaya ayaa la inooga dhigay wax fiican.

Oo la Ina yidhi waa il- baxnimo. Alleylehe waa indho-beel.” Culimada casriga ah ee maanta joogta ayaa ninkaa Soomaliyeed ee reer miyiga ahaa wuxu gartay ku raacay oo waxay yidhaahdeen: “Keli-cunka iyo wax-kala-lahaanshaha qoyska waxa ka fiican in wax la wada lahaado oo gacanta xeedhada la wada geliyo.” Waxa ay sheegeen in keli-cunku keeno cudurro nafsi oo dadkii diiqad geliyay oo qoyskii nac iyo kala-fogaansho ku abuuray. Wadaagga iyo wax-wada-cunkuna waa dawo waxayna keenaysaa isu soo dhawaansho iyo is jacayl ka dhex dhasha bulshada.

Dawadaas oo ah in dadku is-jeclaado oo isku dhawaado. Sheekooyinkaa waxaa kale oo ka mid ah oo la yidhi” nin baa nin qurbaha ku dilay. Beri dambe oo arrintii laga heshiiyay ayuu dalka ku soo noqday.

Isaga oo socoto ah ayaa nasiibku ku soo hagaajiyay in uu u hoydo reerkii uu ninka ka dilay oo aanu garanayn. Reerkii uu usoo hoyday ayaa si wanaagsan u sooryeeyay. Ninkii reerka u weynaa ayaa waraystay oo haybsaday. Wuxu gartay in uu ninkani yahay ninkii wiilkiisa qurbaha ku dilay.

Odeygii waa uu naxayoo wuxu ka baqday in wiilashiisa guriga joogaa oo dhowr ahi arrinkaa inta ay ogaadaan ay ninkaa waxaan laaqi ahayn oo aan ku haboonayn ku yidhaahdaan ama dhibaato ka weynba ku sameeyaan. Odaygii wuxuu talo ku goostay in uu ninkii ilaaliyo. Habeenkii ardaagii wuu ka soo kaxeeyayoo aqalkiisii ayuu seexiyay. Wiilashiisii shaki baa galayoo waxay yidhaahdeen ninkan aanu garanayn ee odaygii uu gurigiisa seexiyay waa maxay. Iyaga oo shakigaa qaba ayaa

subaxdii markii uu ninkii ambo-baxayay ayaa odegii is-yidhi, Armay wiilashaadu intay ninka ka daba tagaan ay u galaan jidka kadibna ay waxyeelo u gaystaan. In uu kaxeeyo ayuu go'aansaday oo wuu raacay. Illaa magaaladii ayuu la socday. Markii ay magaaladii soo wada galeen labadii oo wada socdaa odegii inankiisii la dilay iyo ninkii dilay ayaa rag labadaba garanayaa ku soo yaaceen iyaga oo fajacsan. Kolkaasaa ninkii martida ahaa ayaa odegga reerkiisii uu xalay ku dhaxay iyo sida wanaagsan ee ay u sooreen ka warramay. Markaasaa ninkii martida ahaa loo sheegay odeggu ninka uu ahaa. Waxayna ninkii ku noqotay fajiciso aadna wuu u yaabay.





Waxay sheekadaasi caddaynaysaa gobannimada iyo xeerka ay martidu lahaan jirtay iyo sida loogu dhaqmi jiray. Waxaa iyaduna jirtay in xeerarkaasi ay ahaayeen xeerar nabadgelyo oo fiican oo ninka sameeyay iyo ninka lagu sameeyay labadaba ku reeba wanaag, xurmo iyo naxariis.

Waxayna arintani keenaysaa inay bulshooyinka uu ka dhexeeyo colaado ay u noqoto mid isu soo dhawaysa. Kana dhex abuurta nabad iyo iskaashi hor leh oo dhexmara bulshooyinka soomaalida. Sida muuqatana hab dhaqanka ay soomaalidu caanka ku tahay waa mid sal u noqday nolosha bulshada soomaliyeed.

## Gunaanadka

Sida aynu kor ku soo aragnay marti sooryayntu waxay tahay mid dhaqanka soomaalida meel wayn kaga jirta. Taas oo ah waxyaabha aynu kaga duwanahay bulshooyinka kale. Waana mid aynu ka soo gaadhnay ab ka ab oo aynu hab dhaqan u leenahay. Hadaba waxaa la inooga baahan yahay hab dhaqankan sidaas u qiimaha badan inaynu sii joogtayno. Oo aynu u gudbino jiilka inaga danbeeya. Maadaama uu yahay hab dhaqan bulshada soomaalidu meel wayn kaga jira. Oo ay tahay in la dhiiri galiyo joogtayntiisa.

## Laylis

### ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Sheeg mid ka mid ah dhaqamada ay soomaalidu caanka ku yihiin?
2. Marka ruux qof soo martiyo reer maxay samayn jireen reerkaasi?
3. Odaygii wiilkiisa ninkii dilay soo martiyay muxuu sameeyay?
4. Maxay tahay in la sameeyo si dhaqankan wanaagsan loo joogteeyo?

